City of Seattle

# Sweetened Beverage Tax (Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkoraysan)

Taagerida cunto caafimaad leh iyo kobaca caafimaadka caruurta



Lagasoo bilaabo 2018, Seattle waxay billoowday inay canshuur kaqaado cabitaanada sonkoraysan ee laga baxsho gudaha magaalada. Sweetened Beverage Tax (Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkorta leh) maaha canshuurta iibka ee tooska looga jaro macamiisha. Taas badalkeeda, canshurtaan **(oo dhan 1.75 senti halkii galaan ba)** waxaa laga jarayaa dadka iibiya wax soosaarka waxyaabaha sonkorta leh ee ay ku iibiyaan Magaalada City of Seattle gudaheeda.

Macaamiisha waxay ogaan karaan kor ukac dhanka sicirka ah ee kuyimaada cabitaanada sonkoraysan. Daraasadaha magaalada Seattle waxay muujinayan in ganacsatada iyo macaashleeydu inay Sweetened Beverage Tax (canshuur kusoo rogeen Cabitaanada Sonkorta leh) ee ay gataan macaamiishooda tafaariiqleeyda. Si taas lamid ah, taafaariiqleeyda waxay lacag canshuur ah dulsaaran karaan macaamiisha wax kagadata dhamaan canshuuraha (97 boqolkiiba) ayadoo loo maraayo qiimaha sicirka ee dukaanka ee sareeya.

## Maxay magaalada Seattle canshuurtaan usoo rogtay?

Canshuurtaan waxaa loogu talagalay in kor loogu qaado caafimaadka dadka reer Seattle ayadoo layaraynaayo iibabka iyo isticmaalka cabitaanada sonkoraysan. Intaas waxaa siidheer, dakhliga kasoo xarooda canshuurta waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo helida cunto caafimaad leh iyo barnaamijyada waxbarashada hore. Daraasad ayaa muujinaysa in cabitaanada sonkoraysan ay keeni karaa cayil muddo fog jira, taasoo kor uqaadi karta halis ah in ay dadka kudhacaan **nooca 2 aad ee sonkoroowga**, **dhiig karka** iyo **xanuunka wadnaha**. Cabitaanada sonkoraysan waxay sidoo kale keenaan bololka ilkaha. Dhalada ay kujiraan 20 galaan oo soodhada ah waxaa kujiri kara wax kabadan 15 qaado oo sonkor lagu daray iyo in kabadan 250 kaloriyo ah oo aan lahayn nafaqo fiican.

## Waa maxay cabitaanada lacanshuuraayo?




Soodhada Caadiga ah



Cabitaanada Miraha laga sameeyay



Cabitaanada Tamarta iyo Isboortiga



Biyaha Sonkorta leh



Qaxwaha iyo Shaaha Sonkorta leh



Sharoobooyinka iyo qasqasyada

**20 GALAAN OO SOODHO AH** *waxaa kujira*

**15**



**OO QAADO SHAAX AH**
*oo sonkor lagu daray ah*

**250**

**KALOORIYO AAN NAFAQO LAHAYN**

IYO KALIYA **1 -2 QASAC** MAALINTIIBA

**WAXAY KOR UQAADAYSAA HALISTA**
**SONKOROWGA NOOCA 2**

**26%**

**CANSHUURTU MA QABANAYSO:**




*Cabitaanada nafaqada ah, biyaha saxada ah, cabitaanka 100%, caanaha (ayna kujiraan kuwa beerta lagasoo guro), budada iyo qasqasyada ay qastaan maacaamiishta caba, cabitaanada loo adeegsado arimaha caafimaadka, caanaha caruurta ama dhalaanka, iyo cabitaanada khamriga.*

## Xagee lagaynayaa lacagta?

Sweetened Beverage Tax (Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkoraysan) waxaa loo adeegsadaa in lagu taageero laguna balaariyo barnaamijyada kordhiya helitaanka cunto caafimaad leh iyo taageerista caafimaadka, kobcinta, iyo udiyaar garoowga dugsiga.

### Helitaanka Cuntada 53%

#### Kordhinta helitaanka cunto caafimaad leh

Dakhligu wuxuu balaarinayaa taageerada kaydadka cuntada iyo barnaamijyada kordhiya miraha iyo khudaarta lagu baxsho daryeelka caruurta, dugsiyada barbaarinta, dugsiyada, iyo barnaamijyada dugsiga kadib. Dakhliyada waxaa sidoo kale lagu balaariyaa ***Fresh Bucks***, taasoo dadka danyarta ah kacaawisa inay iibsadaan cuntooyin caafimaad leh.

#### Barnaamijyada cuntada ee bulshada lasiiyo

Dakhligu wuxuu kordhinayaa taageerida barnaamijyada cuntooyinka caafimaadka leh baxsha, keena adeegyada dukaanka, wacyi galin dhanka cuntada iyo nafaqada ahna siiya qoysaska danyarta ah iyo dadka waawayn ee kudhaqan goobaha kaladuwan ee kamid ah daafaha Seattle.

### Caafimaadka Caruurta iyo Waxbarashada Dhalaanka 43%

#### Daryeelka caruurta ee tayada sare leh

Dakhligu wuxuu taageerayaa qoysaska shaqeeya.
Maaliyada ayaa sidoo lagu balaariya caafimaadka, tababarka iyo tagaaeerada tayada barnaamijka ee adeeg bixiyaasha daryeelka caruurta.

#### Barnaamijyada taageerada caruurta

Dakhligu wuxuu taageeraa barnaamijyada booqashada guriga wuxuuna adeegyada cusub oo taageero ah siiyaa caruurta dib udhacyada dhanka kobaca ah qaba.

### Maamulka Canshuurta 4%

Qayb yar oo kamid ah dakhliga ayaa lagu taageeraa maamulka Gudigga Talo Bixinta Bulshada ee Sweetened Beverage Tax (Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkoraysan). Maaliyaduhu waxay taageerayaan qiimaynta shanta sano ah oo lagu daraasaynaayo saamaynada canshuurtu kuleedahay natiijooyinka dhaqaalaha iyo habdhaqanada caafimaadka.

Sanadka 2019, Sweetened Beverage Tax (Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkoraysan) waxay bixinaysaa

**$18.3M**

si loo taageero helitaanka cunto caafimaad leh, caafimaadka caruurta iyo waxbarashada dhalaanka, iyo maamulka canshuurta

